



SHARCIYADA QOYSKA WAXA LA DALBI KARAA KADIB MARKA GO'AAN LAGA SOO GAADHO DALABKA SHARCIGA MAGANGALIYADA

Hadii ad Finland timiday adiga oo dalbanaya magangaliyo xubnaha qoyskaaga ka tirsan waxay ku dalban karaan qoysnimadiina sharci marka ad adigu dalabkaaga go'aan oggolaansho ah u hesho.

Waxa fiican in aad ku talo gasho in wakhtiga ad go'aanka dalabkaaga iyo dalabka xubnaha qoyskaaga ad u helayso ay wakhti dheer qaadan doonto.

Wakhtiga ay falanqaynta dalabyada sharciyada magangaliyadu qaataan waxa lagu cabiray in ay dheeraanayaan muddo gaaban gudaheed, maadaama ay dalabyadu aad u bateen. Kahor dalabyada aadka u tirada badan, wakhtiga falanqayntu waxa uu qaadan jiray lix bilood meelahaas.

Sharcigu waxa uu dhigayaa in go'aanka dalabka sharciga qoyska ay tahay in lagu gaadho sagaal bilood. Way adagtahay in la cabiro dalabaadka gaarka ah ee xubnaha qoysku inta ay qaadan karaan. Wakhtiyada falanqaynta waxa saameyn kara tu-saale ahaan in dalabka loogu baahdo faahfaahin dheeraad ah ama in ay noqoto in la waraysto dalbadaha ama qofka qoyska isku keenaya.

Sharciga waxa laga dalbada safaaradda wadanka Finland dibadiisa ku taala

Xubnaha qoysku waxay ka dalban karaan sharciga safaaradda Finland ee wadanka dibadiisa ku yaala. Waraysi hadii loo baahdo sidoo kale waxa uu ka dhacayaa safaaradda dibada ku taala.

Safaaradaha qaar ka mid ah waraysida helidoodu waxa ay qaadan kartaa mudo aad u dheer.

Sharciga guud ahaan waxa loo ogolaadaa qoyska xubnaha ka tirsan oo kaliya

Shardiyada sharciga helistiisa u yaala marka la buuxiyo kadib waxa sharciga heli kara oo kaliyaata shakhsiga Finland dagan qoyskiisa xubnaha ka tirsan. Kuwaas oo ah:

- Qofka qaan gaadhka ah (ama da'da 18 ka wayn) waxay noqon karaan xaaska ama caaruurta da'da yar (ka hooseeya 18 sano)
- Qofka caruurta ahna (ka hooseeya 18 sano) waalidkii iyo walaaladii

Qaraabada kale sharci waxa Finland loogu oggolaan karaa oo kaliya xaalado gaar ah.

Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan shardiyada sharciga lagu bixiyo waxa laga heli karaa bartayada internetka (websiteka): Xubnaha qoyska qofka magangaliyada caalimaga ah helay.